# Ogeysiinta Asturnaanta & Ammaanka ee HMIS ee Degaanka Multnomah

## Tusmada Qoraalka


[1. Nidaamka Macluumaad ee Maamulka Hoy la'aanta (HMIS)]
[2. Isticmaalka iyo Wadaagida Macluumaadka Ku jira HMIS]
[3. Oggolaanshaha Wadaagista Xogta]
[4. Cida Gelaysa HMIS]
[5. Xuquuqda Qarsoodinimo]
[6. Macluumaadka Xuquuqahaaga]
[5. Sida Macluumaadkaaga Looga Dhigi Doono Mid Sugan]
[6. Faa'iidooyinka Ururinta Macluumaadka iyo Wadaagista]
[7. U hoggaansanaanta Sharciyada Kale]
[8. Wax ka beddelka Ogeysiinta Asturnaanta]
[9. Website-ka]
[10. Macluumaadka meesha la iskala soo xiriirayo]


Bixiyayaasha adeega waxay isku soo ururiyaan macluumaad ku saabsan adiga marka aad adeegyo ka hesho iyaga. Macluumaadka loo isticmaali karo si laguu aqoonsado waxaa loo yaqaan "macluumaadka gaarka ah ee la ilaaliyo" ama "PPI". PPI waxaa ka mid noqon kara waxyaabaha sida magacaaga, cinwaankaaga, lambarkaaga telefoonka, cinwaankaaga email-ka ama lambarkaaga social security-ga. Hay'ad ayay dhici kartaa in ay sidoo kale soo ururiso noocyo kale oo ah PPI. Hay'aduhu waxay sidoo kale si joogto ah u soo ururiyaan macluumaad ku saabsan xaaladaada iyo adeegyada iyo is gudbinta aad hesho.

Ogeysiintan waxay qeexaysaa:

- waxa hay'adaha adeegyada guri la'aanta loo oggol yahay in ay ku sameeyaan PPI aad leedahay
- xuquuqdaada ku saabsan PPI aad leedahay
- waajibaadyada hay'ada ka saaran ilaalinta asturnaanta PPI aad leedahay
- sida loo gudbiyo tabasho haddii aad aaminsan tahay in aan xaquuqdaadii lagu xadgudbay.

Ogeysiintani waxay khuseysaa dhammaan macluumaadka laga soo ururiyay dadka helaya adeegyada. Dhammaan hay'adaha ka tirsan nidaamka adeega guri la'aanta waa in ay raacaan shuruudaha hadda jira ee ku qoran ogeysiintani. Ogeysiintani waxaa la heli doonaa iyada oo ku qoran dhowr luqaddood. Haddii la heli karo, waxaad codsan kartaa nuqul ku qoran luqadda aad aqoonta badan u leedahay.

Sharciga ayaa faraya in PPI aad leedahay laga dhigo mid qarsoodi ah. Si kastaba ha ahaatee hay'adaha aad la shaqeyso ayay dhici kartaa in ay isticmaalaan ama wadaagaan macluumaadkaaga si laguu siiyo adeegyo, iyo si loo buuxiyo sharciga iyo waajibaadyada kale. Codsiga aad codsanayso adeegyo iyo bixinta macluumaadkaaga gaarka ah, waxaad hay'ada u oggolaanaysaa in ay soo ururiso oo keydiso macluumaadkaasi. Waxaad sidoo kale hay'ada u oggonaalaysaa in ay isticmaasho ama wadaagto PPI aad leedahay sida lagu qeexay ogeysiintani ama haddii kale sharci ahaan la iskaga baahan yahay.

Ogeysiintani ma aha heshiis sharci. Degaanku wuxuu leeyahay xaquuq uu mar kasta ku beddeli karo ogeysiintani. Haddii ogeysiintani isbeddesho, waxaanu nuqulka la cusbooneysiiyay soo gelin doonaa website-kayaga oo ka dhigi doonaa mid la heli karo marka la codsado. Wax ka beddel kasta oo lagu

sameeyo ogeysiintani waxay khuseyn doontaa macluumaadka la soo ururiyo labadoodaba ka hor iyo ka dib taariikhda isbeddelka, iyada oo haddii kale la tilmaamo maahane.

Waxaad wakhti kasta codsan kartaa nuqulka ogeysiintayada. Fadlan isticmaal macluumaadka la iskala soo xiriirayo ee ku yaala dhammaadka ogeysiintani si aad u codsato macluumaad dheeraad ah ama u hesho nuqulada ogeysiintani.

# 1. Nidaamka Macluumaad ee Maamulka Hoy la'aanta (HMIS)

Dowladda federaalka ee Maraykanku waxay bixiyayaasha adeega a guri la'aanta uga baahan tahay in ay isticmaalaan meelaha xogta lagu kaydiyo oo gaar ah. Meelahan xogta lagu kaydiyo waxaa loo yaqaan "nidaamka macluumaad ee maamulka hoy la'aanta" ama "HMIS". HMIS waxay mas'uuliyiinta ka caawisaa in ay si wanaagsan u fahmaan baahiyaha dadka aan hoyga lahayn.

# 2. Isticmaalka iyo Wadaagida Macluumaadka Ku jira HMIS

Hay'adaha adeegu guri la'aant ayaa sida caadiga ah macluumaadka aad wadaagto geliya HMIS. Tani waxaa ka mid ah PPI. Inta badan hay'adaha isticmaalaya HMIS waxay xogta ay soo ururiyaan la wadaagaan hay'adaha kale ee sidoo kale isticmaala HMIS. Xogta la wadaagay way ku kala duwanaan kartaa marka la eego hay'adaha iyo barnaamijyada kala duwan. Hay'adaha ku baahsan degaanadu waxay adeegsadaan habab kale oo wax loo wajaho si ay u helaan oggolaanshahaaga ka hor inta aadan wadaagin macluumaadkaaga.

Mararka qaarkood sharcigu wuxuu hay'adaha u oggolaanayaa in ay kaydiyaan oo wadaagaan macluumaadkaaga, oo ay ku jiraan PPI, iyada oo aan la haysan oggolaanshahaaga.

Inta badan maamulayaasha HMIS ee ka shaqeynaya heer Degaan waxay leeyihiin gelitaan buuxa oo la xiriira nidaamka iyo macluumaadka ku jira iyada. Heerkan gelitaanku wuxuu muhiim u yahay hagaajinta nidaamka. Maamulayaasha HMIS waxay ilaaliyaan mabda'a "inta ugu yaraan ee lagama maarmaanka u ah", ee sheegaya in isticmaalayaasha HMIS ay tahay in ay kaliya gelaan qaddarka ugu yar ee xogta lagama maarmaanka u ah fulinta baahiyaha maamulka.

Hay'adaha adeegyada guri la'aanta ee ka jira degaanku waxay macluumaadkaaga gaarka ah u wadaagi karaan ujeedooyinka halkan lagu qeexay hoosta. Ujeedooyinka waxaa loo habeeyay laba qaybood: "May Share" iyo "Must Share". Ujeedooyinka hoos yimaada "May Share" waa kuwo wax shaacin ikhtiyaari ah si loo taageero adeegyada. Kuwa hoos yimaada "Must Share" waa kuwo sharci ahaan la iskaga baahan yahay.

<u>Kuwa la Wadaagi karo</u>

1. Si loo qorsheeyo, bixiyo, la iskugu duwo ama loo wanaajiyo adeegyada guud ahaan hay'ado badan.
2. Si aad u hesho barnaamijyada kale ee ay dhici karto in ay ku caawiyaan.
3. Si loo fuliyo hawlaha maamulka oo ay ku jiraan balse aanan ku koobnayn sharciga, hanti dhawrka, shaqaalaha, qiimeynta barnaamijka, qorsheynta, falanqeynta, warbixinta isku jirta, kormeerka ama shaqooyinka maamulka.
4. Halka wadaagista macluumaadka uu oggol yahay sharcigu ee aan la wadaagin wax ka badan inta sharcigu oggol yahay. Tani waxay dhici kartaa inta lagu jiro xaalad caafimaad oo degdega ah, ama inta la soo sheegayo dembi ka dhan ah shaqaalahayaga ama dembi ka dhacay dhismahayaga, ama si looga hortaggo dhibaato halis ku ah caafimaadka ama ammaanka.

5. Marka adiga ama wakiil la oggol yahay naga codsadaan in aan macluumaad la wadaagno.

*OGOW: Wadaagista PPI waxay u baahan yahay oggolaansho laga haysto hay'ada Hormuudka ka ah HMIS xaaladaha qaarkood. Akhri qaybta loo yaqaan "Data Sharing Approvals" ee hoosta ku qoran si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.*

<u>Kuwa ay tahay in La wadaago</u>

6. Cilmi-baaris uu qandaraasku u baahan yahay halkaasi oo shuruudaha asturnaanta la buuxiyo.
7. Hawlaha la xiriira bixinta lacag bixinta ama dib u bixinta lacagta loogu talagalay adeegyada.
8. Si loogu hoggaansamo waajibaadyada wax soo sheegida sharciga ah.
9. Iyada oo la xiriirta amar maxkamadeed, waaranka 'warrant', amarka imaanshaha maxkamadda 'subpoena' ama dacwad maxkamadeed oo kale.

Waqtiyada qaarkood, isticmaalayaasha HMIS ayay dhici kartaa in ay wadaagaan macluumaadkaaga iyada oo aan la haysan oggolaanshahaaga, sida kor lagu qeexay. Tusaalaha goorta tan la sameyn karo waa marka barnaamij uu ka wareego hal hay'ad ee uu u wareego mid kale. Si looga caawiyo hay'ada cusub sidii ay u adeegi lahayd ka qayb qaatayaasha, hay'adii asalka ahayd waxa dhici karta in ay wax la wadaagto macluumaadka la iskala soo xiriirayo ama macluumaadka mid kale, xataa haddii macluumaadkaasi uusan si cad u sii deyn ka qayb qaatuhu. Tusaalooyin kale ayaa khuseeya.

WellSky, oo ah shirkada iska leh HMIS ee degaanka, ayay dhici kartaa in ay eegto, isticmaasho, oo wadaagto PPI si loo taageero bulshada. Taageerada Wellsky waxaa ka mid noqon kara isku eegida diiwaanada macmiilka, wadaagista xogta sheegashooyinka, ama awood siinta hawlaha la xiriira biilasha ama lacag bixinta. WellSky waxaa sidoo kale dhici karta in ay PPI aad leedahay ku xirto dad kale si ay gacan uga geysato abuurista iyo maareynta diiwaannada macaamiisha.

Waxaan macluumaadka qaarkood wadaagnaa iyada oo la isticmaalayo HMIS si la iskaga ilaaliyo abuurista nuqulada diiwaannada macaamiisha. Isticmaalayaasha HMIS waxay awoodi doonaan in ay arkaan noocyada macluumaadka ee soo socda ee loogu talagalay dhammaan diiwaanada macmiilka:

- Magaca Hore & Dambe
- Lambarka Social Security-ga (oo looga baahan yahay adeegyo gaar ah)
- Magaca la isku yaqaano
- Da'da
- Xaalada Qofka soo halgama

PPI waa in laga saaraa xogta HMIS ka hor inta aanan la wadaagin iyada marka ujeedada wadaagistu tahay mid loogu talagalay cilmi-baaris kaliya. Marnaba ma daabacno PPI ay weheliyaan warbixinnada iyo macluumaadka xog ahaaneed si macluumaad aan shaacino aan loogu isticmaali karin in lagugu aqoonsado.

Ilaalinta asturnaanta iyo badbaadada ee dadka isticmaalaya adeegyada guri la'aantu aad ayay muhiim noogu yihiin. Macluumaadka la isku soo ururiyo ee ku saabsan adigu waa mid shakhsi oo gaar ah. Waxaan macluumaadka soo ururinaa oo kaliya marka ay habboon tahay in la bixiyo adeegyo, la maareeyo ururkayaga, ama sida sharcigu dhigayo.

# 3. Oggolaanshaha Wadaagista Xogta

Degaanka ama hay'adaha ka qayb qaadanaya HMIS waxaa inta badan loo oggol yahay in ay xog u gudbiyaan ama ka saaraan meesha xogta lagu kaydiyo ee HMIS. Waxaa dhici karta in xog loo gudbiyo hay'ad ka qayb qaadanaysa HMIS ama hay'ad aan ka qayb qaadanayn HMIS marka la eego duruufaha qaarkood. "HMIS participating agency" waa hay'ad kasta oo gasha isticmaashana HMIS-ka Degaanka Multnomah. Waax gaar ah, qayb ama koox shaqo ayay dhici kartaa in loo tixgeliyo urur, sidaas darteedna, hay'ad ka qayb qaadanaysa HMIS.

Hay'adaha ka qayb qaadanaya HMIS waxay sii haystaan lahaanshaha macluumaadkooda gaarka ah ee ay soo ururiyaan waxaana lagu keydiyaa meel ka baxsan HMIS. Hay'adaha waxaa dhici karta in macluumaad ay leeyihiin la wadaagaan dhinac saddexaad iyaga oo aan oggolaansho ka haysan Hormuudka HMIS ee Degaanka ilaa iyo inta ay raacayaan dhammaan siyaasadaha & nidaamyada HMIS, siyaasadaha u gaarka ah hay'ada iyo sharciga khuseeya. Sida u dhaxaysa Degaanka iyo hay'ad saxiixday Heshiiska Ka qayb qaadashada Hay'ada HMIS ee Degaanka, macluumaadka ay hay'adu geliso HMIS waxaa iska leh Degaanka.

Shaacinta PPI ee uu iska leeyahay Degaanku ee la siiyo hay'ad aan ka qayb qaadanayn HMIS waa in ay qoraal ahaan ku ansixisaa hay'ada Hormuudka ah HMIS ee Degaanku ama koox kale oo uu qoraal ahaan u ansixiyay Hormuudka HMIS. Oggolaanshahan qoraalka ah waxaa si rasmi ah loogu sameyn doonaa heshiiska wadaagista xogta ama foomka oggolaanshaha wadaagista xogta.

# 4. Cida Gelaysa HMIS

Qof kasta oo gala HMIS wuxuu saxiixaa heshiis lagu ilaalinayo siyaasadahayaga iyo nidaamyadayada. Siyaasadaha HMIS waxay ilaaliyaan macluumaadka iyo asturnaanta dadka isticmaala adeegyada guri la'aanta. Hay'ad kasta oo ka qayb qaadanaysaa waxay saxiixdaa heshiis sharciga waafaqsan oo hay'ada uga baahan in ay u hoggaansanto siyaasadaha & nidaamyada HMIS. Kaliya dad la oggol yahay ayaa geli kara HMIS. Sharraxaadaha soo socda ayaa ah kuwo sax ah sida ku cad cusbooneysiintii ugu dambeysay ee dokumentigan waxaana kaliya loo soo raaciyay si loo bixiyo macluumaad waxtar leh. Degaanku waxaa dhici karta in uu ballaariyo qaybahan wakhti kasta. Maqnaanshaha qaybaha hoose oo kasta kama hor istaagayso qaybaha dheeraadka ah ee dadka in ay ka qayb qaataan HMIS.

Dadka isticmaala HMIS waa:

- Shaqaalaha qaarkood ee jooga hay'adaha ee bixiya adeegyada guri la'aanta
  - Hay'adahani waxay ka hawlgalaan Degaannada Clackamas, Multnomah iyo/ama Washington. Kooxaha qaarkood ee bixinaya adeegyada tooska ee ka shaqeeya degaanka ama waaxyaha magaalada. Dadka ka tirsan kooxdani waxay isticmaalaan HMIS si ay gelaan xogta, iskugu duwaan oo u socodsiiyaan barnaamijyada, waxay dadka ka caawiyaan in ay helaan adeegyo iyo sameynta warbixinnada loo baahan yahay.
- Maamulayaasha HMIS ee ka shaqeeya Degaanka Clackamas, Multnomah ama Washington midkood
  - Dadka ka tirsan kooxdan waxay maamulaan HMIS lafteeda. Waxay sidoo kale tababaraan isticmaalayaasha, qoraan warbixinno, bixiyaan taageero farsamo, la socdaan tayada xogta oo hubiyaan guusha guud ee nidaamka.
- Falanqeeyayaasha xogta
  - Kuwani waa xirfadlayaasha xogta ee ka shaqeynaya hay'adaha adeega ama magaalo ama waaxyaha degaanka ee xog kala soo baxa HMIS, ee isku keena ee falanqeeya iyada si la iskugu wargeliyo go'aan qaadasho xog ku saleysan si hab wanaagsan loogu adeego bulshada degaankeena.

- Shaqaalaha maamulka ee ka tirsan waaxyaha degaanka ama magaalada qaarkood
    - Kooxdan dadku waxay isticmaalaan HMIS si loo xaqiijiyo in barnaamijyadu buuxinayaan shuruudahooda dhanka heshiiska. Waxay sidoo kale taageero siiyaan shaqaalaha jooga hay'adaha adeega.
- Shaqaalaha shirkadda ka ganacsata HMIS
    - Shirkadda ka ganacsata HMIS ayaa martigelisa oo ilaalisa HMIS, kaasi oo ah ganacsi software-ka oo internet-ka ku saleysan. Wellsky waxay ahayd shirkadda ka ganacsata HMIS ee bulshadeena laga soo bilaabo sanadkii 2005-ka ilaa sanadkii 2025-ka. Waqti ka mid ah sanadka 2026-ka ama sanadka 2027-ka, bulshadu waxay u guuri doontaa HMIS cusub. HMIS-ka cusub waxaa la doortay sanadkii 2025-ka. Magaca cusub ee shirkadda HMIS waa Bitfocus.

# 5. Xuquuqda Qarsoodinimo

Dhaqamada asturnaanta iyo qarsoodinimada ee lagu qeexay ogeysiintani waxay sameeyaan xeerarka ku saabsan sida loo isticmaali karo macluumaadka HMIS. Xeerarkan waxaa ansixiyay Waaxda Adeegyada Guri la'aanta (HSD) ee Degaanka Multnomah. HSD waa hay'ada Hormuudka ka ah HMIS ee loogu talagalay Multnomah waxaana u oggolaaday in ay xeerarkan ansixiyaan guddigeena Continuum of Care ee Degaanka Multnomah. Guddiga Continuum of Care waa koox dad ah oo ka mas'uul ah go'aan qaadashada loogu talagalay nidaamka adeegyada guri la'aanta. Hababkani waxay raacaan dhammaan xeerarka qarsoodinimada ee khuseeya, oo ay ka mid yihiin xeerarka loogu talagalay barnaamijyada dhaqaale loogu talagalay adeegyada guri la'aanta ka hela HUD ama dhinac saddexaad oo kale. Xeerarka asturnaanta iyo ammaanka oo gooni ah ayaa khuseeya macluumaadka caafimaad ee sharcigu dhowrayo ee ku xiran Xeerka Federaalka ee Haynta Macluumaadka Caafimaad iyo Masuuliyadda (HIPAA). PHI waa macluumaad kasta oo ku jira diiwaannadaada caafimaad oo loo isticmaali karo in lagu aqoonsado adiga ama macluumaadka ku saabsan xaaladaada caafimaad.

Qof iyo hay'ad kasta oo loo oggolaado in ay akhriyaan ama macluumaad geliyaan HMIS waxaa loo tababaray siyaasadaha qarsoodinamada macmiilka. Waxay sidoo kale saxiixeen heshiis si macluumaadka looga dhigo mid qarsoodi ah oo sugan. Qof ama hay'ad kasta oo jebiya heshiiskoodu waxay lumin karaan gelitaankooda waxayna mutaysan karaan ciqaabo dheeraad ah.

# 6. Macluumaadka Xuquuqahaaga

Qofka adeegyo ka helaya Degaanka Multnomah ahaan, waxaad leedahay xuquuqaha soo socda:

1. *Gelitaanka diiwaankaaga*. Waxaad xaq u leedahay in aad dib u fiiriso oo nuqul ka sameyso diiwaankaaga HMIS. Haddii aad soo dirto codsi si aad u fiiriso diiwaankaaga, shaqaalaha Degaanka ama hay'ada ayaa jawaab hore ku bixin doona shan maalmo shaqo gudahood. Haddii gelitaanka diiwaankaaga la diido, waxaa lagu siin doonaa dokumenti qoraal ah oo ku saabsan codsigaaga iyo sababta aan u nidhi maya. Nuqulka dokumentigaasi ayaa sidoo kale lagu soo dari doonaa diiwaanka adeegyadaada.
2. *Sixitaanka diiwaankaaga*. Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in aan saxno diiwaankaaga. Haddii aanu diidno codsigaaga si loo saxo diiwaankaaga, waxaa lagu siin doonaa dokumenti qoraal ah oo ku saabsan codsigaaga iyo sababta aan u nidhi maya. Nuqulka dokumentigaasi ayaa sidoo kale lagu soo dari doonaa diiwaanka adeegyadaada.

3. *Diidmada*. Guud ahaan, haddii aad go'aansato in aadan macluumaadkaaga siinin hay'ad, waxaad weli awoodi doontaa in aad hesho adeegyo. Si kastaba ha ahaatee, awooda lagu bixinayo adeegyada qaarkood waxay ku xiran tahay yeelashada PPI qaarkood. Haddii hay'ad tahay in ay soo ururiso macluumaadka qaarkood si ay u bixiso adeegyo, shaqaalaha hay'ada ayaa ku hagi doona inta lagu jiro nidaamkaasi.
4. *Xaqa Hay'adu u Leedahay Diidmada Kormeerka Diiwaanka Shakhsi*. Degaanka Multnomah iyo adeeg bixiyayaashoodu waxa dhici karta in ay sababaha soo socda kuugu diidaan xuquuqda aad u leedahay in aad eegto ama aad nuqul ka samaysato PPI-gaaga:
    a. macluumaadka oo ah qayb ka mid ah koox dokumentiyo sharci ah oo lagama maarmaan ah;
    b. iyada oo leh macluumaad gaar ah oo ku saabsan qof kale oo aan ahayn ka mid ka mid ah shaqaalahayaga;
    c. macluumaadka oo uu na siiyay qof kale oo ballan qaaday qarsoodinimo iyada oo in la wadaagana lagu aqoonsan lahaa qofkaasi; ama
    d. wadaagista macluumaadka oo qof kale gelin karta halis waxyeello ama geeri.
5. *Wa dhibaateynta*. Waxaanu leenahay xaquuqda aan ku diidi karno codsigaaga ah in aad fiiriso, nuqul ka samaysato ama saxdo diiwaankaaga HMIS haddii codsiyada loo sameeyay si isdaba joog ah, ama hab wax dhibaateynaya
6. *Tabashada*. Waxaad xaq u leedahay in lagu maqlo:
    a. haddii aad dareemayso in xuquuqdaadii qarsoodinimo lagu xadgudbay,
    b. haddii laguu diiday gelitaanka diiwaannadaada HMIS sabab la'aan,
    c. ama haddii lagu geliyay halis shakhsi, ama waxyeello lagu gaarsiiyay.
    d. Hay'adaha aad la shaqeyso waxaa looga baahan yahay in ay ilaaliyaan nidaam habraac oo qoran kaasi oo adiga ama xubin ka tirsan qoyskaagu aad soo bandhigi kartaan cabasho ku saabsan bixinta adeega. Nidaamka wax tabashada ee hay'ada waa in aad si fudud ku heli kartaa. Hay'adu waxay ku siin doontaa talo ku saabsan nidaamka wax tabashada marka la codsado.

# 5. Sida Macluumaadkaaga Looga Dhigi Doono Mid Sugan

Ilaalinta badbaadadaada iyo asturnaantaada iyo in diiwaannadaada laga dhigo kuwo qarsoodi ah aad ayay muhiim noogu yihiin. Waxaanu tababar, siyaasado, nidaamyo iyo software u isticmaalnaa siyaabaha soo socda si aanu u xaqiijino in PPI aad leedahay ammaan yahay oo sugan yahay:

1. Shaqaalaha isticmaala HMIS waxay isticmaalaan tallaabooyinka farsamo iyo urur oo ku habboon si looga ilaaliyo PPI aad leedahay gelitaan aan la oggolayn, burburinta aan lagu tala gelin ama aan sharciga ahayn, luminta, wax ka beddelka, iyo wax shaacinta aan la oggolayn.
2. Kaliya dadka tababaran oo la oggol yahay ayaa geli doona ama arki doona PPI aad leedahay.
3. Magacaaga iyo PPI kale kuma jiri doonaan warbixinnada HMIS ee la siiyo hay'adaha degaanka, gobolka ama qaranka ee aanan geli karin HMIS.
4. Dadka isticmaalaya HMIS waxay helaan tababar ah dhanka ilaalinta asturnaanta oo oggol yihiin in ay raacaan xeerarka qarsoodinimada oo adag ka hor inta aysan isticmaalin nidaamka.
5. Marka lagu daro shaqaalaha WellSky, maamulayaasha nidaamka HMIS ee ka shaqeeya Degaanka ayaa taageera icticmaalka meelaha xogta lagu kaydiyo. Maamulayaasha nidaamku ayaa raaca oo hirgeliya xeerarka aan ku sharraxnay ogeysiintan ee ilaalinaya asturnaanta macluumaadkaaga.

## 6. Faa'iidooyinka Ururinta Macluumaadka iyo Wadaagista

Macluumaadka aad bixiso ee la geliyo HMIS wuxuu qaadan karaa door muhiim ah. Wuxuu taageeraa awoodaha bulshadeenu si ay u sii wado bixinta adeegyada aad adiga iyo kuwa kale ee ka tirsan bulshadu codsanaysaan. Wuxuu awood wanaagsan siiyaa isku duwida adeegyada ee guud ahaan hay'adahaasi wuxuuna kaa caawiyaa helitaan dhakhso ah ee adeegyada.

Waxay sidoo kale naga caawisaa in aan fahamno tirada dadka u baahan adeegyada ee ka tirsan bulshada iyo noocyada adeegyo ee ay u baahan yihiin kooxo dad ah oo kale duwan. Tani beddelkeeda waxay noo saamaxdaa in aanu:

1. Si fiican u muujino baahida loo qabo adeegyada iyo nooca caawimaad ee gaarka ah ee looga baahan yahay degaankeena.
2. Adeegyo badan ka dhigno kuwo la helo karo si loo daboolo baahiyaha bulshada.
3. Qorsheyno, wanaajino, oo bixino adeegyo tayo leh.
4. Hayno tirokoobka la iskaga baahan yahay ee dhaqaale-bixiyayaasha gobolka iyo federaalka, sida HUD.

## 7. U hoggaansanaanta Sharciyada Kale

Degaanka Multnomah, wuxuu u hoggaansan yahay dhammaan sharciyada kale ee federaalka, gobolka iyo degaanka ee ku saabsan xuquuqda gaarka ah. La tasho qareen haddii aad hayso su'aalo ku saabsan xuquuqahani.

## 8. Wax ka beddelka Ogeysiinta Asturnaanta

Ogeysiintani Asturnaanta & Ammaanku way isbeddeli kartaa. Haddii ay sidaas tahay, isbeddeladu waxay khuseyn doonaan dhammaan macluumaadka ku jira HMIS, oo uu ka mid yahay macluumaadka la soo ururiyay ka hor isbeddelka. Isbeddelo kasta oo ku yimaada Ogeysiintan waa in ay raacaan xeerarka ka soo baxay dowladda federaalka. Xeerarkan waxay ilaalinayaan asturnaantaada waxayna hagayaan sida aan u isticmaalno HMIS.

## 9. Website-ka

Waxaanu nuqulka Ogeysiintani Asturnaanta iyo Ammaanka, oo ay ku jiraan noocyo la turjumay ku haynaa: https://hsd.multco.us/hmis-links-for-providers/hmis-privacy-security-notice/

## 10. Macluumaadka meesha la iskala soo xiriirayo

La xiriir hmishelp@multco.us si aad u weydiiso su'aalo ku saabsan dokumentigani ama u codsato macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan HMIS ama asturnaantaada.